**2.** Waa maxay biilasha kale ee aad bixiso?

☐ Biyaha/bulaacada ☐ Qashinka ☐ Korontada ☐ Gaaska ☐ Telefoonka ☐ Kuwo kale: ____________________

## Kharashyada masruufka carruurta ee ay maxkamaddu-amarto

**1.** Miyuu jiraa qof gurigaaga ku nool oo bixiya masruuf carruur ee ay maxkamad-amartay oo la siiyo qof ka baxsan gurigaaga? ☐ Haa ☐ Maya

**Haddii ay jawaabtu haa tahay,** waxaad fadlan buuxisaa halka hoose.

| Qofka bixiya masruufka | Carruurta masruufka loogu talagalay | Inta la bixiyey |
|---|---|---|
| | | $ |

## Kharashyada caafimaadka

**1.** Miyuu jiraa qof aad dalab u soo gudbinayso oo ah 60 jir ama ka weyn ama qof qaba naafonimada SSI/SSD? ☐ Haa ☐ Maya

**Haddii ay jawaabtu haa tahay,** waxaad soo taxdaa kharashyada caafimaadka ee aad jeebkaaga ka bixiso, oo ay ku jiraan kharashyada caymiska caafimaadka.

| Qofka jeebkiisa ka bixiyay kharashka | Inta la bixiyey |
|---|---|
| | $ ______________________ bishii |

## Wax inooga sheeg hantida reerkaaga

**1.** Adiga, ama qof kasta ee aad u codsanaysid miyaad leedihiin ama magaciina miyuu ku yaal waxyaabaha soo socda:

**a)** Xisaabta socota, kaydka, xisaabta ururrada shaqaale, IRA, 401K ☐ Haa ☐ Maya

**b)** Saamiyada gaarka ah, saamiyada dawladda, xisaabta lacagta suuqyada, CD-yada, lacagta ammaanada ☐ Haa ☐ Maya

**c)** Lacagta la haysto ama wax kale: ______________________________________ ☐ Haa ☐ Maya

**Haddii aad haa uga jawaabtay mid ka mid ah waxyaabaha kore,** waxaad fadlan soo buuxisaa inta hoose.

| Nooca | Magaca/meesha uu ku yaal bangiga | Haraaga haatan/qiimaha | Cidda iskaleh |
|---|---|---|---|
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |

**2.** Miyuu jiraa qof iibsanaya, ama iska leh, hanti ma guurto ah, dhulal ama dhismayaal aadan ku nooleyn? ☐ Haa ☐ Maya

**3.** Miyuu jiraa qof haysta alaab qiimo leh? *(Tusaalooyin: gaari yar, gaari weyn, doon, iwm.)* ☐ Haa ☐ Maya

**4.** Adiga ama qof ka tirsan qoyskaagu ma ku dhaawacanteen shil aad dalbanaysaan lacag? ☐ Haa ☐ Maya

**Haddii ay jawaabtu haa tahay,** waa maxay taariikhda dhaawacu yimid? ___________________________

**Haddii ay jawaabtu haa tahay,** fadlan buuxi foomka MSC 0451, *Dhaawaca Qofka ee la Xiriira Shilka Gaari ama MSC 0451NV, Dhaawaca Qofka ee aan la Xiriirin Shilka Gaari.*

| Agency use only | ☐ FUA | ☐ LUA | ☐ IUA | ☐ TUA | ☐ COS |
|---|---|---|---|---|---|

## Wax nooga sheeg gargaaradaada cuntada ee gobolka ka baxsan

1. Oregon waxay leedahay wakhtiga la cayimay oo 3 bilood ah oo loogu tala galay gargaarada SNAP. Wakhtigan la cayimay waa mid inta badan loogu talagalay dadka waaweyn ee da'dooda tahay 18 ilaa 52 jir ee awooda inay shaqeeyaan isla markaana lahayn carruur da'doodu ka yar tahay 18 oo ka tirsan kiiskooda SNAP. Waxay SNAP heli karaan mudo 3 bilood ah oo kaliya wakhti ka kooban 3 sano. Bilaha aad SNAP ka heshay gobol kale waxaa lagu xisaabinayaa Wakhtiga Cayiman ee Oregon.

   Adiga ama qof aad u dalbayso miyuu SNAP ka qaatay gobol kale tan iyo Janaayo 1, 2022-ka? ☐ Haa ☐ Maya

**Haddii ay jawaabtu haa tahay,** waxaad fadlan buuxisaa halka hoose:

| Qofka | Gobolka |
|---|---|
| | |
| | |
| | |
| | |

**Haddii aad codsanayso gargaarada daryeelka carruurta oo kaliya, waxaad u gudubtaa bogga 14.**
**Waxaad akhrisaa 14–17 waxaadna saxiixdaa bogga 17.**
**Si aad u codsato SNAP iyo lacagta fadlan halkaan ka sii wad.**

## Wax inooga sheeg bulshada halka aad ku nooshahay

1. Ma ku nooshahay mid ka mid ah kuwo soo socda?
   - Dhul ay Maamulaan Hindida Maraykanku ☐ Haa ☐ Maya
     Haddii ay jawaabtu haa tahay, waa kee? ______________________
   - Bulshada Hindida ku Tiirsan ☐ Haa ☐ Maya
     Haddii ay jawaabtu haa tahay, waa kee? ______________________
   - Dhulka Hindida Maraykanka loo Qoondeeyay ☐ Haa ☐ Maya
     Haddii ay jawaabtu haa tahay, waa kee? ______________________

**Haddii aad codsanayso cuntada oo kaliya, waxaad u gudubtaa bogga 13.**
**Waxaad akhrisaa 13–17 waxaadna saxiixdaa bogga 17.**
**Si aad u codsato lacagta fadlan halkaan ka sii wad.**

## Wax nooga sheeg waqtigaaga TANF

1. Oregon waxay leedahay wakhti cayiman oo 60 bilood ah oo loogu tala galay Gargaarka Ku Meel Gaarka ah ee Qoysaska u Baahan (TANF). Bilaha aad TANF ka hesho gobol kale ama barnaamijka TANF ee qabiilka waxaa lagu xisaabinayaa Wakhtiga Cayiman ee Oregon.

   Adiga ama qof aad dalab u soo gudbinayso miyuu TANF ka qaatay gobol kale ama barnaamijka TANF qabiilka tan iyo 1996-kii? ☐ Haa ☐ Maya

   **Haddii ay jawaabtu haa tahay,** waxaad fadlan buuxisaa halka hoose:

| Qofka | Gobolka ama Qabiilka | Bilaha la qaatay TANF |
|---|---|---|
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |

## Wax inooga sheeg ka mid ahaanshahaaga qabiilka

**1.** Miyuu jiraa qof aad dalabka u soo gudbinayso oo ka tirsan mid ka mid ah sagaalka qabiil ay dawladda federaalku aqoonsan tahay?

Haddii ay jawaabtu haa tahay, waa qabiilkee(qabiiladee): ☐ Ha ☐ Maya

- ☐ Qabiilka Burns Paiute
- ☐ Isbahaysiga Qabiilada Coos, Lower Umpqua iyo Hindida Siuslaw
- ☐ Qabiilka Hindida ee Coquille
- ☐ Hindida Umpqua ee Cow Creek Band
- ☐ Qabiilada Klamath
- ☐ Isbahaysiga Qabiilada Siletz
- ☐ Isbahaysiga Qabiilada ee Dhulka ay Maamulaan Hindida Umatilla
- ☐ Isbahaysiga Qabiilada Warm Springs
- ☐ Isbahaysiga Qabiilada Grand Ronde

**2.** Miyuu jiraa qof aad dalabka u soo gudbinayso oo ka tirsan mid ka mid ah qabiilo kale oo ay dawladda federaalku aqoonsan tahay?

| Qofka | Qabiilka |
|---|---|
| | |
| | |
| | |

## Wax inooga sheeg naafonimada reerkaaga

**1.** Miyuu jiraa qof aad dalab u soo gudbinayso oo leh naafanimo soconaysa ilaa 12 bilood?

☐ Haa ☐ Maya, Haddii ay jawaabtu haa tahay, waa kee? ____________________

**2.** Ma jiraa qof ku nool gurigaaga oo codsatay ama tixgelinaya in uu codsado faa'iidooyinka naafanimada iyada oo la adeegsanayo Xafiiska Social Security-ga? ☐ Ha ☐ Maya

Haddii jawaabtu ay haa tahay, miyaa arjiga codsi: ☐ La oggolaaday ☐ La diiday ☐ La sugayaa

## Wax inooga sheeg waalidiinta aan reerka ka mid ahayn

**Muhiim –** Marka aad adeegyada codsanayso, waxaad ina siinaysaa fasax aan ku ogaanayno aabaha *(si aan si sharci ah u aqoonsano aabaha ilmaha)* una sii baadi goobno masruufka carruurta ee lagu helaayo waalidiin aan ku noolayn gurigiina haddii aadan adigu ka cabsi qabin in uu waalidkani dhibaateeyo adiga iyo ilmaha.

**1.** Haddii qof gurigaaga ka tirsani uur leedahay, miyuu aabuhu ku nool yahay guriga? ☐ Haa ☐ Maya

**2.** Ma jiraa waalid ilmaha dhalay ee aqalka dibeddiisa ku nool? ☐ Haa ☐ Maya

Haddii ay jawaabta haa tahay, waxaad soo taxdaa waalidiinta carruurtaada ee aan kula nooleyn (oo uu ku jiro xataa waalidka ilmaha aan dhalan). Sidoo kale, waxaad soo taxdaa waalidkaaga haddii aad ka yar tahay 18 sano oo aadan la nooleyn. **Waxaad fadlan ina siisaa warbixin intii suuragal ah.**

### a) Waalidka maqan 1

| | | | |
|---|---|---|---|
| Magaca *(hore, billawga magaca dhexe, dambe)*: | Kani waa: ☐ xaaska ama xaaskii hore ☐ ilmo<br>☐ saaxib ama saaxib hore ☐ carruurta xaasku dhashay/dhalay<br>☐ wax kale: ________________ | | |
| Nooca: ☐ Dheddig<br>☐ Lab | Taariikhda dhalasho: *(bisha, maalinta, sanadka)*:<br>Lambarka Daryeelka Bulshada – SSN *(haddii aad taqaan)*: ___-__-____ | | |
| Cinwaanka: | Magaalada: | Gobolka: | ZIP code-ka: |
| Telefoonka: ___-___-____ | Taariikhda uu waalidkan ka guuray ilmaha *(bisha, maalinta, sanadka)*: | | |
| Tirada saacadaha toddobaad kasta ee waalidkani ilmaha(carrruurta):<br><br>Imisa ka mid ah saacadan ayaa ilmaha (carruurta) lagula qaaday guriga: | Liiska ku qor magacyada waalidka ilmaha(carruurta) ee aad waxkaga tilmaantay arjigan. | | |
| Haddii uu aabbaha maqan yahay, hore miyaa loo xaqiijiyay aabbenimada.<br>☐ Haa ☐ Maya ☐ Ma aqaan | | | |
| Miyaad filaysaa in waalidkan uu dhibaato idiin geysan karo adiga iyo ilmaha haddii aan dabagalno xaqiijinta aabbenimada ama caymiska caafimaadka? ☐ Haa ☐ Maya | | | |

### b) Waalidka maqan 2

| | | | |
|---|---|---|---|
| Magaca *(hore, billawga magaca dhexe, dambe)*: | Kani waa: ☐ xaaska ama xaaskii hore ☐ ilmo<br>☐ saaxib ama saaxib hore ☐ carruurta xaasku dhashay/dhalay<br>☐ wax kale: ________________ | | |
| Nooca: ☐ Dheddig<br>☐ Lab | Taariikhda dhalasho: *(bisha, maalinta, sanadka)*:<br>Lambarka Daryeelka Bulshada – SSN *(haddii aad taqaan)*: ___-__-____ | | |
| Cinwaanka: | Magaalada: | Gobolka: | ZIP code-ka: |
| Telefoonka: ___-___-____ | Taariikhda uu waalidkan ka guuray ilmaha *(bisha, maalinta, sanadka)*: | | |
| Tirada saacadaha toddobaad kasta ee waalidkani ilmaha(carrruurta):<br><br>Imisa ka mid ah saacadan ayaa ilmaha (carruurta) lagula qaaday guriga: | Liiska ku qor magacyada waalidka ilmaha(carruurta) ee aad waxkaga tilmaantay arjigan. | | |
| Haddii uu aabbaha maqan yahay, hore miyaa loo xaqiijiyay aabbenimada.<br>☐ Haa ☐ Maya ☐ Ma aqaan | | | |
| Miyaad filaysaa in waalidkan uu dhibaato idiin geysan karo adiga iyo ilmaha haddii aan dabagalno xaqiijinta aabbenimada ama caymiska caafimaadka? ☐ Haa ☐ Maya | | | |

***Waxaad fadlan koobiyaal ka sameysaa boggaan haddii ay jiraan waalidiin kale.**

## Macluumaadka ku saabsan gargaarada lacageed

Gargaarada lacageed waxaa sidoo kale loo yaqaan Gargaarka ku Meel Gaarka ah ee Qoysaska u Baahan (TANF) ama Taageerada Lacageed ee Qoxootiga (REFC). Gargaarada lacageed waxaa loogu talagalay buuxinta baahida aasaasiga ah ee qoyska sida cuntada, dharka, hoyga iyo alaabada.

Inta badan gargaarada lacageed ee Oregon waxaa la bixiyaa iyagoo la isticmaalayo kaarka Elektranoonikada ah ee Gargaarka Cuntada (EBT). Kani sidoo waxaa loo yaqaan Kaarka Cayrta ee Oregon. Taageerada lacageed lagama yaabo in loo isticmaali in wax lagula baxo ama la kharash gareeyo iyadoo la isticmaalayo Kaarka Cayrta ee Oregon wixii ku saabsan:

- Tukaan khamriga gada. Tani waxaa ka mid ah ganacsiga kaliya gada ama inta badan gada khamriga beer-ka ama khamriga wine-ka.
- Goob khamaarka loogu tala galay (casino), goob khamaarka lagu cayaaro (gambling casino) ganacsiga ciyaaraha.
- Ganacsi bixiya goobaha dadka waawayni ka helaan waxyaalaha galmada ku saabsan ee dadka wax soo bandhigayaa ay dharka iska saaraan ama waxku soo bandhigaan xaalad aan dhar la xirnayn. Tani waxaa ka mid ah tukaanka dadka waaweyni ku fiirsadaan cajaladaha fiidiyaha galmada la xiriira ee kaliya gada ama inta badan gada ama soo bandhiga cajaladaha fiidiyaha galmada la xiriira ama filimada.
- Xarunta Marijuana laga bixiyo.

Xayiraadahani waxay khuseeyaan:

- Marka la joogo Oregon dhexdeeda.
- Meelaha ka baxsan Oregon.
- Dhulka qabiilada Hindidu degaan.

Xayiraadahani waxay sidoo kale khuseeyaan gargaarada lacageed ee ku jira koontada (account) bangi gaar ah.

### Haddii aad codsanayso gargaarka lacagta ee qoysaska:

#### U xilsaaridda" lacagaha iyo gobolku xaqa uu u leeyahay in uu lahaado sheegashooyinka dhaawaca

Si aad ugu qalanto taageero, waa inaad u ogolaataa Waaxda Adeega Dadwaynahu ODHS inay qaataan wixii lacag ah ee adiga ama xubnaha kale ee qoyskaagu, oo ay ka mid yihiin carruurta aan wali dhalan ee mustaqbalku, taageero ahaan uga helaan ama xaqa ay u leeyihiin inay ka helaan:

- Dadka kale, ganacsiyada kale ama meelaha kale ee ay tahay ama suuragal ah in ay bixiyaan lacagaha la xiriira dhaawaca sida shil gaari.

Waxaa jira xadi ah cadadka ODHS ay ka qaadan karto. Ma ay qaadan karto in ka badan inta ay gargaarada lacageed idinku siisay adiga iyo qoyskaaga.

Sexeexida arjigani, waxaad ku raacsan tahay inaad ka caawiso ODHS inay raadiso sidoo kale hesho lacag bixintani. Haddii adiga ama xubin kale oo qoyska ka tirsani ay gargaaro ku helayaan shil ama dhaawac oo soo gaarsiiyay qof kale ama ganacsi waa in aad ODHS ugu sheegtaa muddo 10 maalmood gudahood ah. Waxaa suurta gal ah in gobolku helo lahaanshaha lacagta laga helo sheegashooyinkan.

### Haddii aad codsanayso gargaarka lacagta ee qoysaska:

#### Waxaad u baahan tahay in aad ka ogaato "u xilsaaridda taageerada"

"Taageerada" waxaa loola jeedaa lacagta aad heshaan adiga iyo carruurtaada, sida masruufka xaaska ama masruufka carruurta.

Marka aad hesho gargaarka lacagta, waxaad gobolka u "xilsaartay" in ay helaan taageerada aad adiga ama qof kasta oo reerkaaga ka tirsan ka heshaan qof kale. Lacagta waxaa dib loogu bixinayaa lacagta caddaanka ah ee aad gobolka ka heshaan.

**OGOW:** Tani ma ay quseynayso muddada aad qaadato gargaarada lacageed ee JOBS Plus, Barnaamijka Qoyska Gobolka ee Pre-SSI/SSDI (SFPSS) ama Barnaamijka Post-TANF; marka aad tihiin laba waalid; ama marka aad helayso Lacagta Shaqada.

**Tani macnaheedu waa in inta aad helayso gargaarka lacagta:**

Wuxuu gobolka la harayaa qayb ka mid ah lacagta taageerada *(ee lacagihii haatan iyo kuwii lagu lahaa ee hore)* ee la idiin soo qaaday adiga iyo qoyskaaga. Gobolka lama hari doono lacagta taageerada masruufka carruurta oo idil. Wuxuu gobolka kuu soo diri doonaa $50 oo ah taageerada masruufka carruurta uu gobolka bil walba u soo qaado ilmo kasta illaa $200 qoyskiiba bil walba. Gobolka lacagtaa uma xisaabin doono dakhli ku soo gala marka la eegayo inta aad gargaarka u qalanto.

**OGOW:** Haddii aad tahay codsadaha taageerada lacageed oo aad ka tirsan tahay SFPSS ama JOBS Plus ama aad tihiin qoys ka kooban laba waalid, gobolku sida caadiga ah haysan maayo lacagtaada masruufka carruurta. Marka go'aan laga gaarayo u qalmiddaada iyo gargaarka, $50 *(carruur kasta bil walba illaa $200 qoyskiiba bishii)* oo ah masruufka carruurta haatan la helo looma xisaabin doono dakhliga bishii ku soo gala.

**Marka aad ka baxdo gargaarka lacagta:**

- Lacagaha taageerada ee haatan adiga ayaa qaadanaya.
- Lacagihii hore ee bilaha aad qaadanaysay gargaarka lacagta waxaa la haraya gobolka;
- Lacagaha bilihii hore ee aadan qaadan gargaarka lacagta adiga ayaa helaya.

**La shaqeynta qaybta Masruufka Carruurta**

Inta aad helayso gargaarka lacagta, waa in aad wada-shaqeyn la yeelato Barnaamijka Masruufka Carruurta.

**Muhiim ah:** Ma aha in aad wadashaqeyn la yeelato qaybta masruufka carruurta haddii ay khatar idiin keenayso adiga ama carruurtaada.

**La shaqeynta qaybta masruufka carruurta waxaa looga jeedaa:**

- In la helo waalidka kale ee ilmahaaga *(aan ka ahayn marka ay khatar idiinkaaga imaanayso adiga iyo carruurta)*;
- In si sharci ah loo magacaabo aabbaha ilmahaaga *(caddeynta waalidka)*;
- Helitaanka amarka masruufka.

## Macluumaadka ku saabsan ganaaxyada barnaamijka lacageed

**Haddii aad ula-kac u sameyso waxyaabaha soo socda si aad u hesho Gargaarka Ku Meel Gaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF) iyo/ama Taageerada Lacageed ee Qoxootiga (REFC) waa lagu ganaaxayaa:**

- Aad warbixin been ah iska bixiso ama ka bixiso qof kale ee aad u codsanayso;
- Aad qariso warbixin kugu saabsan ama ku saabsan qof kale ee aad u codsanayso;
- Aad warbixin been ah ka bixiso meesha aad ku nooshahay.

Marka ugu horreysa ee aad sameyso waxyaabahan ma aad heli doontid gargaarka TANF muddo 12 bilood ah. Marka labaad ma aad heli doontid gargaarka TANF muddo 24 bilood ah. Marka seddexaad ma aad heli doontid TANF oo idil. Sidoo kale waxay noqonaysaa in aad dib u wada bixiso dhammaan gargaarka TANF ee ahayd in aadan helin. Gargaarkaaga cuntada ma uu kordhaayo xittaa haddii aad hesho lacag TANF oo yar haddii aad inoo sheegto wax aan run ahayn ama aadan inoo sheegin wax run ah.

Marka ugu horreysa ee aad sameyso waxyaabahan ma aad heli doontid gargaarka REFC muddo 3 bilood ah. Marka labaad ma aad heli doontid gargaarka REFC muddo 6 bilood ah. Sidoo kale waxay noqonaysaa in aad dib u wada bixiso dhammaan gargaarka REFC ee ahayd in aadan helin. Gargaarkaaga cuntada ma uu kordhaayo xittaa haddii aad hesho lacag REFC oo yar haddii aad inoo sheegto wax aan run ahayn ama aadan inoo sheegin wax run ah.

| Haddii aad sameyso waxyaabaha soo socda… | Waxaad weynaysaa gargaarka cuntada…. |
|---|---|
| • Aad macluumaad qariso ama aad been sheegto;<br>• Aad isticmaasho kaarka EBT-ga ee qof kale iska leeyahay;<br>• Aad u Isticmaasho gargaarka cuntada si aad ugu iibsato khamri ama sigaar/tubaako;<br>• In laga ganacsado ama iibiyo gargaarka cuntada ama kaararka EBT;<br>• La tuuro qasaca wax lagu cabo si lacag loogu helo;<br>• Cuntada lagu gatay kaararka gargaarka cuntada oo dib loo gado iyadoo lacag lagu badalanayo. | • 12 bilood dembiga hore;<br>• 24 bilood dembiga labaad;<br>• Daa'in dembiga seddexaad. |
| • Gargaarka cuntada oo lagu beddesho maandooriyeyaasha sida daroogada. | • 24 bilood dembiga hore;<br>• Daa'in dembiga labaad. |
| • Gargaarka cuntada oo lagu beddesho hub, rasaas ama waxyaabaha la qarxiyo. | • Daa'in. |
| • Ganacsi, iibsashada ama iibinta gargaarka cuntada qiimihiisu ka badan yahay $500. | • Daa'in. |
| • Bixinta macluumaad been ah ee ku saabsan cidda aad tahay ama meesha aad ku nooshahay si aad u hesho gargaarka cuntada oo dheeraad ah. | • 10 sano dembi kasta. |
| Sidoo kale waxaa lagu ganaaxi karaa illaa $250,000 ama waxaa lagu xiri karaa illaa 20 sano, ama labaduba, haddii aad sameyso waxyaabahan. Sidoo kale waxaa suuragal ah in lagugu xukumo sharciyada u dhigan dawladda dhexe. | |
| **Haddii aad si ula-kac ah sameyso waxyaabaha soo socda...** | **Waxaa suuragal ah in...** |
| • Aad isticmaasho kaarka EBT-ga ee aadan adigu lahayn;<br>• Aad kaarkaaga EBT-ga ku wareejiso dad kale;<br>• Aad iibsato ama haysato kaarka EBT-ga ee aadan adigu lahayn | • Aad tahay eedeysane galay dembi weyn ama dhaqan xumi;<br>• Lagu ganaaxo;<br>• Xabbis lagu geliyo;<br>• In aadan u qalmin gargaarka cuntada in muddo ah. |

## Siyaasadayada aan kala takoorka ku dhisnayn

Waaxda Adeegyada Dadweynaha (ODHS) iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) qofna takoori maayaan. Tani macnaheedu waa in ODHS iyo OHA ay taageeri doonaan cida u qalanta oo ayna qofna si kale ula dhaqmi doonin sobobtoo ah da'da, asalka, midabka, dal laga soo jeeda, jinsiyada, diinta, siyaasada la aaminsan yahay[1], naafanimada ama dookha galmo.

Waxaad gudbin kartaa cabasho haddii aad u malaynayso in ODHS ama OHA sababahan midkood kuu takooreen. Si aad gobolka cabasho ugu gudbiso, waxaad waci kartaa Xafiiska Qareenka Gudoomiyaha Gobolka 1-800-442-5238 (TTY 711) ama qoraal u dir xafiiskooda:

Governor's Advocacy Office
500 Summer Street NE, E17
Salem, OR 97301
Email-ka: GAO.info@odhs.oregon.gov

---

Sida ku cad sharciga federaalka ee sharciga xuquuqda dadweynaha iyo xeerarka iyo siyaasadaha u yaala xuquuqda dadweynaha ee Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA), waaxdani waxay mamnuucaysaa kala takoorida la xiriirta jinsiyada, midabka, dalka laga soo jeedo, lab ama dheddig, *(oo ay ku jiraan is-aqoonsigaaga qof ahaaneed iyo dookha galmo)*, caqiiqada diimeed, naafanimada, da'da, siyaasada la aaminsan yahay[1], ama aargoosiga ama aargushado oo loogu talagalay hawlaha xuquuqda dadweynaha oo hore.

Macluumaadka barnaamijka waxaa suuragal ah in ay jiraan iyagoo ku qoran luqaddo aan ka ahayn Ingiriisiga. Dadka naafada ah ee u baahan noocyo kale oo isgaarsiin si ay u helaan macluumaadka barnaamijka *(tusaale, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee Braille, farta waaweyn, cajalada la duubo, Luqadda Calaamadaha ee Maraykanka)*, waa in ay la xiriiraan hay'ada *(gobolka ama degaanka)* halka ay ka dalbadeen gargaarada Shakhsiyaadka aan dhagaha wax ka maqlin, aanan si fiican wax u maqli karin, ama dhibaato hadal qaba waxay la xiriiri karaan USDA iyagoo isticmaalaya Adeega Gudbinta ee Dawladda Dhexe 'Federal Relay Service' 800-877-8339.

Si aad cabasho kala takoorida barnaamijka u gudbiso, Qofka cabanayaa waa in uu buuxiyaa Foomka AD-3027, Foomka Barnaamijka Cabashada Kala takoorida ee USDA kaasi oo laga helo kari internet-ka: https://www.usda.gov/sites/default/files/documents/ad-3027.pdf, oo laga helayo xafiis kasta oo ay leedahay USDA, iyada oo la wacayo 833-620-1071, ama iyada la qorayo warqad lagu hagaajo USDA. Warqadu waa in ay ka koobnaataa magaca, cinwaanka, lambarka telefoon, sharraxaad qoran ee ficilka kala takoorida ee la isku soo eedeeyay oo ku qoran faahfaahin ku filan si loogu wargeliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqda Madaniga ah (ASCR) oo ku saabsan xaalada iyo taariikhda xadgudubka xuquuqda madaniga ah ee la isku soo eedeeyay. Foomka la buuxiyay ee AD-3027 ama warqada waa in loo gudbiyaa:

**Boosta:**:
Food and Nutrition Service, USDA
1320 Braddock Place, Room 334
Alexandria, VA 22314; ama
**Fax-ka:** 833-256-1665 ama 202-690-7442; ama
**Email-ka:** FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov

**Waaxdani waa fursad shaqo bixiye loo wada siman yahay.**

## Waa maxay sababta aan u doonayno Lambarka Daryeelka Bulshada

**Lambarka Social Security-ga (SSN)** – Sharciyada dawlada dhexe (42 USC 1320b-7(a) iyo (b), 7 USC 2011-2036, 42 CFR 435.910, 42 CFR 435.920 iyo 42 CFR 457.340(b)) iyo xeerka ODHS (OAR 461-120-0210) wuxuu uga baahan yahay qofkasta oo codsanaya gargaarada lacageed ama cunto inay ODHS siiyaan SSN-kooda. Haddii aad keento SSN, waxay dedejin kartaa hawsha arjiga codsi. Haddii qof aanu lahayn SSN, booqo www.ssa.gov.

a. ODHS waxay isticmaali doontaa SSN-kaaga si ay uga caawiso go'aanka ah inaad u qalanto gargaarada. SSN-kaaga waxaa loo adeegsan doonaa si loo xaqiijiyo dakhligaaga, hantidaada, iyo in lagu eego macluumaadka gobollada kale iyo dawladda dhexe sida IRS, Medicaid, masruufka carruurta, Social Security-g, iyo gargaarada Shaqo La'aanta iyo barnaamijyada kale ee taageerada dadweynaha.

---

[1] Macaamiisha Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeraadka ah (Supplemental Nutrition Assistance Program - SNAP) way ka dhawran yihiin wixii kala sooc aaminsanaan siyaasadeed ah.

b. Waxaa suurta gal ah in ODHS ay u isticmaasho SSN-kaaga si ay u diyaariso macmuulaad la soo ururiyay ama warbixin ay codsatay ilo dhaqaalaha fidiyay ee barnaamijka aad codsatay ama aad gargaarada ka heshay.

c. Waxaa suurta gal ah in ODHS iyo OHA ay isticmaalaan ama shaaca ka qaadaan SSN-kaaga:
   - Haddii loo baahdo in barnaamijka aad dalbaneyso ama gargaarka aad ka hesho looga shaqeeyo;
   - Si loo sameeyo qiimeynta tayada iyo horumarinta hawlaha;
   - Si loo xaqiijiyo tirada saxda ah ee lacagta iyo in dib loo soo celiyo gargaarka dheeraadka ah ee la bixiyay;
   - Si loo hubiyo in qofna uu hal qoys ka badan gargaar ku helin.

**Lambarada Social Security-ga loogama baahna Taageerada Lacageed ee Qoxootiga (REFC) ama Shaqaalaynta la Xiriirta Daryeelka Carruurta (ERDC).**

## Macluumaadka ku saabsan xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga

### Haddii aan saxiixo halka hoose waxaan kula raacsanahay:

- Waxaan siiyay ODHS iyo Waaxda Waxbarashada Hore (DELC) macluumaad sax ah, run ah oo dhamaystiran;
- Waxaan fahmay in haddii aan bixiyo warbixin been ah ama aan macluumaad qariyo loo fasiri karo ciqaabta gobolka iyo dawladda dhexe, iyo weliba in dib loo bixiyo wixii lacago dheeraad ah ee la bixiyay *(waxaa ku jira wakiilada loo fasaxay gargaarka lacagta)*;
- ODHS dib ayay u eegi karaan dacwadayda. Tani waxaa ku jiri karta inay gurigayga yimaadaan;
- In aan caddeynayo in aan degganahay Oregon;
- Waan ku wargalin doonaa macluumaadka is badala ee aan siiyo ODHS marka ODHS iiga baahato;
- In aan macluumaad sax ah ka bixiyey jinsiyaddeyda iyo tan dadka kale ee aan gargaarka u codsanaayo;
- Waan ogsoonahay in ODHS ay fiirin doonaan xaalada muhaajirnimo ee dadka codsada ama hela gargaarada. Waan ogsoonahay in macluumaadka ay ODHS ka helaan Adeega Waaxda Socdaalka iyo Muwaadinimada Maraykanka (United States Citizenship and Immigration Service - USCIS) uu saamayn ku yeelan karo qofka hela gargaarada. **ODHS ula xiriiri mayso USCIS qofkii aanan raadinaynin gargaarada;**
- Waxaan ogolaanayaa inaan sii daayo diiwaanka taageerada carruurtayda ee ka socda Waaxda Cadaalada (Department of Justice - DOJ), Qaybta Taageerada Carruurta (Division of Child Support - DCS) kuna socda ODHS;
- In waayeelka ay da'doodu ka yar tahay 60 sano ee foomkaan ku yaal oo codsanaya gargaarka cuntada (SNAP) ay iska diiwaan gelin doonaan barnaamijka shaqada ee gobolka. In haddii aan mustaqbalka dad ku daro barnaamijka, in ay sidoo kale is diiwaan gelin doonaan;
- Haddii aan ODHS siin waayo nambarka Socail Security-ga qof raba gargaarada, qofkaasi waxaa laga yaabaa inuu awoodi waayo inuu helo;
- In ODHS aysan isticmaali doonin kharashyada hoyga, caafimaadka, xanaanada carruurta iyo masruufka carruurta ay maxkamadda amarto si loo ogaado gargaarkayga haddii aan anigu soo wargelin;
- ODHS iyo DELC waxay codsan doonaan isla markaana isticmaali doontaa xogta Habka Xaqiijinta Dakhliga iyo U qalmida (IEVS) iyada laga yaabo in macmuulaadkani in uu saamayn ku yeelan karo u qalmida iyo heerarka gargaarka. Tani waxaa ka mid ah caddeyn la sameynayo iyada oo la isticmaalayo koox saddexaad oo lala xiriiraayo marka la ogaado in uu jiro kala duwanaansho dhanka macluumaadka ah. Kooxdan saddexaad waxaa laga yaabaa in ay ka mid noqdaan isku aadinta diiwaanada bangiga, dakhliga iyo gargaarka shaqo' la'aanta.
- Waan fahamsanahay in ODHS ay suurta gal tahay inay isticmaalaan ama shaaca ka qaadaan SSN-kayga iyo SSN-ka qofkasta oo soo codsada, sobobaha ku qoran liiska bogga 14 awgeed;
- Waxaa suurta gal ah in ODHS iyo DELC ay macluumaadka ku qoran arjigan siiyaan:
  - Hay'adaha dawladda dhexe iyo gobolka oo dibu eegista sameynaya;
  - Saraakiisha sharciga dhaqangeliya, si looga caawiyo inay soo xiraan qof sharciga ka baxsanaya;
  - Wakaaladaha dawlada dhexe iyo gobolka iyo wakaaladaha lacag soo celinta gaarka ah, haddii ay tahay inaan dib u bixiyo gargaarada ODHS iyo DELC.
- Waxaa suuragal ah in ODHS macluumaadkan u isticmaasho maamulida barnaamijyada kale ee taageerada dadweynaha ee aan ka helo ODHS.

- Waxaan fahamsanahay in ODHS ay suuragal tahay inay la socdaan halka aan u isticmaalo gargaarkayga lacageed ee TNF anigoo adeegsanaya Kaarkayga Cayrta ee Oregon ama kula baxo gargaarada lacageed ee TANF anigoo adeegsanaya Kaarkayga Cayrta ee Oregon. Sidoo kale waxaan fahamsanahay in aanan Kaarkayga Cayrta ee Oregon u isticmaali karin inaan ku kharash gareeyo gargaarada lacageed ee TANF ama kula baxo gargaarada lacageed ee TANF wixii ku saabsan:
  - Tukaan khamriga gada. Tani waxaa ka mid ah ganacsiga kaliya gada ama inta badan gada khamriga beer-ka ama khamriga wine-ka.
  - Goob khamaarka loogu tala galay (casino), goob khamaarka lagu cayaaro (gambling casino) ganacsiga ciyaaraha.
  - Ganacsi bixiya goobaha dadka waawayni ka helaan waxyaalaha galmada ku saabsan ee dadka wax soo bandhigayaa ay dharka iska saaraan ama waxku soo bandhigaan xaalad aan dhar la xirnayn. Tani waxaa ka mid ah tukaanka dadka waaweyni ku fiirsadaan cajaladaha fiidiyaha galmada la xiriira ee kaliya gada ama inta badan gada ama soo bandhiga cajaladaha fiidiyaha galmada la xiriira ama filimada.
  - Xarunta Marijuana laga bixiyo.

  **Xayiraadahani waxay khuseeyaan:**
  - Marka la joogo Oregon dhexdeeda.
  - Meelaha ka baxsan Oregon.
  - Dhulka qabiilada Hindidu degaan.

  Xayiraadahani waxay sidoo kale khuseeyaan gargaarada lacageed ee ku jira koontada (account) bangi gaar ah.
- Waan fahamsanahay qofka sexeexay arjigani waa inuu dib u siiyo gargaarada ODHS iyo DELC marka dacwadayda jirto lacag siyaado ah oo la bixiyay. Dadka kale ee looga baahan yahay in ay ila codsadaan iyo wakiilka la ogolyahay waxaa suuragal ah in uu sidoo kale bixiyo wixii lacago siyaado ah ee la bixiyay.
- Waan fahamsanahay in aad codsan karo nuqulka arjigayga oo ah warqad ama qaab elektaroonik ah.
- **Dadka codsanaya gargaarada lacageed** — Waxaan gobolka u fasaxayaa in ay la haraan lacagaha taageerada, sida ku cad boggaga 11-12. Waxaan fahamsanahay inayna ahayn inaan la shaqeeyo barnaamijka taageerada carruurta haddii ay tani khatar u leedahay aniga iyo ilmahayga.
- **Dadka codsanaya gargaarada lacageed iyo cuntada** – Waxaan fahmay in aan gargaarka cuntada ka qaadan karin barnaamijka Qaybinta Cuntada Qabiilka iyo barnaamijka gargaarka cuntada SNAP isku hal mar. Sidoo kale qabiil ma qaadan karo gargaarka TANF ee Qabiilka iyo gargaarka lacagta TANF ee ODHS isku hal mar.
  - Waxaan caddeynayaa sida ku cad ciqaabta been abuurka in warbixinta laga bixiyey dadka aqalkayga ku nool, oo ay ku jiraan warbixinada jinsiyadda, dakhliga, maaliyadda, hantida maguurtada iyo dhammaan macluumaadka aan siiyey ODHS iyo qandaraasleyaasha in ay yihiin kuwo run iyo sax ah.
  - Waxaan bixin doonaa caddeyn ku saabsan macluumaadka aan siiyey ODHS. Sidoo kale waxaan u fasaxayaa in ODHS ay la xiriirto dadka iyo hay'adaha kale si ay caddeyn uga hesho.
- **Dadka codsanaya Shaqaalaynta la Xiriirta Daryeelka Carruurta** — Waxaan fahamsanahay in wixii gargaaro ah ee daryeelka carruurta la xiriira ee aan helo aan u gudbin doono Waaxda Dhakhliga Oregon, taasi oo laga yaabo in ay saamayn ku yeelato deynta cashuurta ee la igu leeyahay iyo/ama lacagta laga yaabo in ay ii soo noqoto.
- Waan fahamsanahay in laga yaabo in aan doorto in daryeel bixiyaha carruurtayda uu gurigayga yimaado si uu bixiyo daryeel. Haddii daryeel bixiye uu si joogta daryeelka ugu bixiyo gurigayga waxaa laga yaabaa in la ii tixgeliyo in aan ahay shaqo bixiyaha qofkaasi sida uu dhigayo sharciga federaalku. Shaqo bixiye ahaan, waxaa la iiga baahnaan doonaa in aan buuxiyo shuruudaha u yaala heerka mushaharka ugu yar ee federaalka iyo heerarka waqtiga dheeraad ah ee la shaqeeyo.

  BOLI Taageero Farsamo oo loogu talagalay Barnaamijka Shaqo bixiyayaasha ayaa laga helayaa:
  - **Internet-ka:** https://www.oregon.gov/boli/ta/Pages/index.aspx;
  - **Email-ka:** bolita@boli.state.or.us; iyo
  - **Telefoonka:** 971-673-0824

  Xeerarka mushaharka ugu yar ee federaalku waxay ku jiraan Xeerka Nidaamka Caddaalada ah Ee Shaqada (FLSA). Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xeerka caddaalada shaqada iyo si aad u ogaato haddii aad tahay shaqo-bixiye:
  - **Booqo:** https://www.dol.gov/agencies/whd/compliance-assistance
  - **Wac khadka bilaashka ah ee macluumaadka iyo khadka taageerada:** 1-866-4USWAGE (1-866-487-9243).

**Fadlan usii gudub bogga 17, waa inaad akhrisaa sixiixdaana**.

## Caddeynta iyo saxiixa

**Waxaan akhriyey oo fahmay xuquuqdayda iyo waajibaadkayga sida lagu soo sharraxay halka sare ee foomka DHS 4214, waxaana haystaa koobiga foomka.**

______________________________ ______________

Saxiixa sharciga arjiilaha oo dhammeystiran/wakiilka loo fasaxay | Taariikhda

______________________________ ______________

Saxiixa sharciga waalidka kale, xaaska/odayga ama ama waayeelka kale oo dhammeystiran | Taariikhda

______________________________ ______________

Saxiixa shaqaalaha markhaatiga ah | Taariikhda

Waa maxay sida ugu fiican ee aan kugula soo xiriiri karno?

☐ Telefoonka: ______________________________

☐ Email-ka: ______________________________

☐ Kuwo kale: ______________________________

Waa maxay maalmaha iyo waqtiyada kuu habboon in aan kula soo xiriirno? ______________________________

### Isku diiwaan gelinta cod bixinta

Haddii aadan isku diiwaan gelin in aad codayso halka aad hada ku nooshahay, ma rabtaa in aad maanta codsato codaynta?

☐ Haa ☐ Maya

Codsiga isku isdiiiwaan gelinta ama diidmada isku isdiiwaan gelinta in aad codkaaga dhiibato saamayn kuma yeelanayo taageerada ay ku siin doonto waaxdani.